HUMAN RIGHTS WATCH

www.hrw.org

Itoobiya: Ciidamada oo Ogaden Ka Geystey Toogasho Bareer ah, Jirdil iyo Kufsi

Dawladaha Deeqda Bixiya Waa inay Qaadaan Tallaabo si Loo Joojiyo Dembiyada Ka Dhanka ah Bani'aadannimada

(Nairobi, June 12, 2008) - Dagaalka ay dawlada Itoobiya kula jirto mucaaradka ka jira Gobolka Soomaalida ee bariga Itoobiya, waxay ciidamadu kula kaceen dadka rayidka ah falal isugu jira dilal bareer ah, jirdil, iyo kufsi, sida ay ku warrantey hay'adda u dooda xuquuqda aadanaha ee Human Rights Watch, oo warbixin cusub maanta soo saartey. Dagaalladaas baahsani waxay qayb ka yihiin olole ba'an oo dawladu kula jirto xoogagga mucaaradka kuwaasi oo u dhigma dembiyo dagaal iyo dembiyo ka dhan ah bani'aadannimada, waxayna sii murjiyeen masiibo bani'aadannimo oo halkaasi ka jirtay taasi oo halis gelinaysa badbaadada kumannaan dad reer miyi ah oo isir ahaan Soomaali ah.

Warbixinta oo ka kooban 130 bog cinwaankeeduna yahay, "Ciqaab Wadareed: Dembiya Dagaal iyo Dembiyo Ka dhan ah Bani'aadannimada oo ka dhacay Deegaanka Ogaden ee Gobolka Somalida ee Itoobiya" waxaa uu soo gudbinayaa dagaalka aan cidina war u hayn ee lagu hayo dadka rayidka ah oo sare u kac yaab leh ku yimid tan iyo bishii Juun ee 2007, markaasoo ciidamada Itoobiya ay billaaben olole ay kula dagaallamayaan koox hubaysan oo mucaarad ah oo weerartey xarun batrool oo ay kashaqeynayeen dad Shiine ahi. Warbixinta Human Rights Watch waa xogtii ugu horreysey oo soo gudbinaysa u kuur-gal qoto dheer u eegeysa noocyada tacadiyadii dagaal aan weli cidina si fiican o ogeyn xayiraad adag oo ay xukuumadu saartey darteed.

“Jawaabtii ay ciidanka Itoobiya siiyeen Mucaaradka waxay noqotey weerarro cadawtinnimo ah oo ay la beegsaneyeen shacabka ku nool Ogadeeniya" waxaa sidaa yiri Agaasimaha qaybta Afrika ee Human Rights watch Georgette Gagnon. "Tacadiyadaas baahsan ee sida ku talogalka ah loo fulinayo waxay u dhigmaan denbiyo ka dhan ah bani'aadannimada. Sidaasoo ay tahayna xukuumadaha deeqda ugu badan siiya Itoobiya ee Washington, London iyo Brussels waxay u muuqdaan inay ka aamusan yihiin dembiyadaas sidii inay wax ka ogyihiin.”

Xog-baarayaal ka tirsan Human Rights Watch la kulmay oo wareystey in ka badan 100 qof oo isugu jiray goobjoogayaal iyo dhibanayaal loo gaystey xadgudubyo, waxaa ay sidoo kale wareysteen hoggaamiyaasha baayacmushtarka, ganacsato, saraakiil dawladeed oo kala jooga maamul-goboleedka dalka deriska ah ee Kenya, maamulka Somaliland ee waqooyiga Soomaaliya iyo Itoobiya. Xog-baaristan oo inteeda badan la fuliyey mudadii u dhaxaysey bilihii Sebteembar iyo Diseembar ee 2007, waxaa sidoo kale loo adeegsadey

muuqaallo xagga satalayt-ka ah oo xaqiijiyey qaar ka mid ah xaafadaha rayidka oo gubanaya. Dad goobjoogayaal ah iyo dhibanayaal ayaa si laga argagaxo uga warramay Human Rights Watch falal isugu jira habeenkii oo dadka lagu garaaco qoriga baadkiisa, dilal bareer ah iyo xaafado dhan oo dab la qabadsiiyey.

Wabixinta ayaa sharxaysa sida ciidamada Itoobiya ay uga jawaabeen weerar bishii Abriil ee sanadkii 2007 ay Jabahadda Xoreynta Ogaden ee ONLF ku qaaddey xarun batroolka laga qodayey oo ku taalla Obele, weerarkaasi waxaa lagu diley in ka badan 70 muwaadiniin Shiine ah iyo dad rayid Itoobiyaan ah. Intii ay socdeen ololihii ugu ballaarnaa ee dagaalka ka dhanka ah xoogagga mucaaradka ee bilihii Juun illaa Sebteembar, waxaa ay goobjaagayaashu ka sheekeeyeen sida ciidamada Itoobiya ay si qasab ah u bara-kiciyeen beelo dhan oo ku dhaqnaa dhulka miyiga ah sidoo kalena ay u burburiyeen tobannaan xaafadood oo dad rayid ahi deganaayeen, waxaa sidoo kale ay si fagaare ah u toogteen ugu yaraan 150 qof oo rayid ah, mararka qaarna waxay fulinayeen dilal la soo bandhigayo oo dadka la tusinayo si loo argagixiyo beelaha lagu tuhmayo inay taageeraan jabhadda ONLF; Ciidamada ayaa sidoo kale si aan sharciga waafasanay u soo qabqabtey boqollaal dad rayid ah kuna soo xirey xeryo millateri halkaasi oo ay kula kulmeen garaacis, jirdil, kufsi baahsan iyo noocyo kale oo fara-xumayn ah. Kumannaan rayid ah ayaa ka cararey deegaannadii dagaalladu saameeyeen oo galay dalalka deriska ah. Weli qaar ka mid ah tacadiyadii dagaalku waa ay socdaan waxaana ay Human Rights Watch rumaysan tahay in xogta ay soo heshey ay tahay oo kaliya inyar oo ka mid ah xadgudubyadii la geystey.

Mas'uuliyiinta Itoobiya waxaa ay sidoo kale dar-dar geliyeen inay si qasab ah ugu diiwaan geliyaan dadka deegaanka inay noqdaan ciidan maliishiyo ah, waxana badankood loo diraa iyagoon tababar ciidan qabin inay lasoo dagaallamaan jabhadda ONLF waxaana taas ka dhasha qasaare dhimasho oo lixaad leh.

Jabhadda mucaaradka ah ee ONLF ayaa iyana mas'uul ka ah meel ka dhacyo waaweyn ee xeerarka dagaalka oo ay ku jiraan dilal bareer ah oo ay u gaysatey rayid isugu jira Shiine iyo Itoobiyaan kadib markii ay bishii April ee sanadkii 2007 weerartey xarun shidaal oo ku taalla Abole iyo dilalka dadka lagu tuhmayo inay dawlada la shaqeeyaan, waana falal loo arko dembiyo dagaal.

Shacabka ku nool deegaannada ay dagaalladu saameyeen badankood waa reer miyi ay tahay inay u guuraan hadba halkii daaqsin cusub leh iyo gobollada suuqa fiican leh si ay xoolahooda ugu iibiyaan. Tan iyo bartamihii sanadka 2007 ciidamada Itoobiya waxay soo rogeen tallaabooyin ay kaalmada dhaqaale kaga goynayaan jabhadda ONLF sida ganacsiga oo laga xayirey gobolka ay dagaalladu saameeyeen, ciriiri la geliyey helidda biyaha, cuntada iyo dhulka daaqsinta leh, in lala wareego xoolaha iyo badeecooyinka ganacsiga iyo in la hor istaagey gargaarkii bani'aadannimo. Abaaraha ka dhashey roob yari isku xigsatey dhowr xilli waxaa ugu sii darsamey "Dagaalkan dhaqaalaha" lagu curyaaminayo oo halis gelinaya nolosha kumannaan dad rayid ah, sidaasoo ay tahay ayaa hadana dadkaas badankood aan la gaarsiin karin cuntada gargaarka ah faragelinta dawladdu ku hayso cunno qaybinta darteed.

“Weerarrada ay dawladdu ku hayso dadka rayidka ah, is-hortaageeda ganacsiga iyo xayiraadda gargaarka intuba waxay u dhigmaan ciqaab sharci darro ah oo si wadar ah loola beegsadey tobannaan kun oo qof" ayey tiri Gagnon. "Haddii hay'adaha gargaarka aan dhaqsi si madaxbannaan loogu ogolaanin inay soo qiimeeyaan baahida isla markaana aanay la socon cunto qaybinta dad intaa ka badan ayaa ku naf waayi doona."

Dawladda Itoobiya kama aysan soo jawaabin codsiyo ah in Human Rights Watch loo ogolaado inay tagto deegaannadii ay dagaalladu saameeyeen, waxayna isku daydey inaan wax war ahi dibadda uga soo bixin gobolka. Qaar warfidiyeenka shisheeye ka mid ah oo isku dayey baaritaanno madax bannaan inay sameeyaan ayaa la xirey, sidoo kalena waxaa baqdin-gelin iyo xarigba loo gaystey dadka deegaanka iyo dad marqaatiyaal ahaa si looga horjoogsado inay kor u hadlaan. Bishii Luuliyo ee sanadkii 2007 dawladdu waxa ay gobolka Soomaalida ka eridey Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas ICRC, inkasta oo xukuumadu wixii markaa ka dambeeyey ay u ogolaatey qaar ka mid ah hay'adaha QM iyo kuwa gargaarka inay ka hawlgalaan hadana waxaa lagu hayaa xakamayn adag.

Warbixintu waxay sidoo kale falanqaynaysaa jawaabaha ay xukuumada Itoobiya iyo beesha caalamkuba ka bixyeen xadgudubyada weli sii socda. Itoobiya waxay weli waddaaa inay beeneyso eedaymahaasi, hadana weli wax baaritaan ah oo ay ku samaysay ma jirto iyo cid lala xisaabtamay toona. Human Rights Watch waxay leedahay in dawladaha deeqda bixiyaa ay ku guuldarreysteen inay dalbadaan ka xisaabtamidda xuquuqada aadanaha, iyagoo weliba Itoobiya siiya gargaar dhaqaale oo wax ku ool ah kaalinteeda ay ka qaadato dadaallada ka hortagga argagixisada ee gobolka darteed.

Dawladaha Reer Galbeedka iyo hay'adaha caalamiga ah sida Mareykanka, Britain iyo Midowga Yurub oo kaliya waxay Itoobiya kaalmo ahaan u siiyaan sanad kasta ugu yaraan $2 bilyan oo Dollarka Mareykanka ah, hadana waa ay isaga aamusan yihiin xadgudubyada baahsan ee ka dhacaya deegaanka Ogaden. Dawladda Mareykanka oo u aragta Itoobiya saaxiib muhiim u ah dadaallada gobolka ee ka hortagga argagixisada, waxay ku guuldarreysatey inay kaalmada muhiimka ah ee ay siiso Itoobiya sida gargaarka Milateri ay u adeegsato cadaadis ahaan si loo joojiyo dembiyadaas.

Human Rights Watch waxay ugu baaqdey deeq-bixiyayaasha waaweyn inay ku cadaadiyaan Itoobiya inay soo afjarto dagaallada waxayna ku talo bixinaysaa:

- Dawladda Mareykanku waa inay baartaa wararka ku saabsan xadgudubyada ay gaysteen ciidamada Itoobiya, waa inay aqoonsataa haybta ciidamadii sida gaarka ah ugu lug lahaa, lana xaqiijiyaa inaysan wax gargaar ah ama tababarba ka helin dawladda Mareykanka illaa iyo inta dawladda Itoobiya ay qaadayso tallaabooyin wax ku ool ah oo sharciga lagu hor keenayo kuwii ka mas'uulka ahaa, sida uu qabo xeerkii "Leahy law" oo mamnuucaya in Mareykanku kaalmo milateri siiyo cutubyada ciidamada dal dibedda ah ee ku xadgudba xuquuqda aadnaha iyadoon cidina la xisaabtamayn.
- Dawlada Britain iyo Midowga Yurub waa inay cambaareeyaan tacadiyada, waa inay si rasmi ah ugu baaqaan xukuumada Itoobiya inay baarto dembiyada ka

dhacay gobolka Soomaalida, waa inay dalbadaan in saraakiisha rayidka ah iyo kuwa ciidamadaba lala xisaabtamo, waana inay la socdaan maalgelinta dhinacyada horumarinta si loo xaqiijiyo inaan loo isticmaalin hawlgallada amniga.

“Dawladaha saamaynta lihi waxay isticmaalaan cudur-daarro badan - sida inaysan xogbadan hayn iyo kala mudnaansho xag istiraatijiyadeed ah - si ay hoos ugu dhigaan muhiimada walaac murugo leh oo ka jira gobolka Soomaalida," ayey tiri Gagnon. oo sii raacisey "laakiin dembiyada ku lidka ah bani'aadannimadu ma ahan kuwo derinta hoosteeda lagu qarin karo. Dawladaha deeq-bixiyayaasha ahi waa inay dib uga fiirsadaan siyaasadahooda ku wajahan Itoobiya illaa iyo inta tacadiyadani ka istaagayaan kuwii ka mas'uulka ahaana cadalada la hor keenayo".

Xogtii ay bixiyeen marqaatiyaal lagu xusey warbixinta

“Askartu waxa ay yimaadeen tuulada Aleen, kadib markii ay soo gubeen Lahelow. Markaas meesha ayaan joogney. Askartu waa ay yimaadeen waxayna dadka amar ku siiyeen inay guryahooda ka soo baxaan. Dadkii oo dhan ayey meel isugu keeneen Dabadeedna taliyihii ayaa amrey in tuulada dab la qabadsiiyo. taliyuhu wuxuu nagu yiri 'Hore ayaan idin kugu sheegey inaad ka tagtaan tuulooyinkan yar yar, ' dabadeedna qasab ayey nooga saareen. Dab ayeyna wada qabadsiiyeen guryihii oo dhan. Guryuhu waxay wada ahaayeen carshaan, marka waa ay sahlan tahay in la gubo.'"
- qof tuulada deganaa, September 23, 2007

“Waxaa la ila kaxeeyey laba nin oo kala ahaa Xasan Cabdi C/llaahi iyo Axmed Gaani Guuleed. Ugu horreyn xarig ayey qoorta kaga xireen labada nin waxayna u kala jiideen labada dhinac, labadoodiiba dhulka ayey ku dhaceen. Waxay igu rideen god intii ay ceejinayeen labada nin. Askari ayaa isku dayey inuu anigana igu ceejiyo ul bir ah oo loo isticmaalo sifeynta qoriga {oo uu birta dhuunta iiga riixo), laakiin farta ayaan ka maroojiyey illaa uu i sii daayey. Kadibna labadii askari ee kale ayaa yimid xarig ayeyna qoorta iiga xireen waxayna billaabeen inay i jiidaan. Taas ayaana iigu miyir dambaysey. illaa aan ka soo miyirsado anigoo weli godkii ku dhex jira. Qof mayd ah oo qaawan ayaa i dul saarnaa, waxaa uu ahaa Axmed Gaani Guuleed oo dhintey. Waan ka soo bixi kari waayey godkii illaa ay i arkeen dhowr dumar ah oo ceelka biyo u soo doontey."
- Ridwaan Xassan-raage Saahid, Oktoobar 30, 2007

“Waxay igu garaaceen baadka qoryahooda AK-47. Hal marna waxay qoriga iiga dhufteen wejiga, kadibna waxay billaabeen inay i garaacaan. Waxay sidoo kale qoriga afkiisa iiga dhufteen ilkaha, ilig ayeyna iga rideen. Waxay hadana billaabeen inay igu garaacaan suun iyagoo igala dhacaya dhabarka iyo cagaha. Waxayna i garaacayeen in ka badan hal saac. Hadana lugaha ayey xarig iiga xireen waxayna iga so laa-laadiyeen saqafka guriga iyadoo madaxu ii hooseeyo, waxyna sii wadeen inay i sii garaacaan, iyagoo ii sheegaya inaan qirto. Laba bilood ayaana nalaku wadey jirdil kaas la mid ah, iyadoona qolalkayaga nalaka bixinayo habeenkii si naloo soo garaaco oo nala soo jirdilo."
- 31-jir dukaan-iibiye ah, September 20, 2007.

“Waxay doonayeen inay intayada kale niyad jebiyaan, waxayna keeneen laba gabdhood oo ay ku sheegeen inay ahaayeen taageerayaasha ugu xoogan ee jabahdda ONLF. Waxayna intayadii kale ku qasbeen inay daawadaan markii ay dilayeen labada gabdhood. Ugu horreyn waxay isku dayeen inay ka dhaliyaan inay wax qirtaan, iyagoo ku yiri haddii kale waan idin dilaynaa. dabadeedna labadoodiiba waa ay toogteen. Magacyadoodu waxy kala ahaayeen Faadumo Xasan oo 17 jir ah iyo Samsam Yuusuf oo 18 jir ah, labadooduba ardey ayey ahaayeen."
- Arday ayaa sidaas sheegey, September 23, 2007.

“Waxaan Qoriley ku leenahay Ceel laga cabo, waxaana lagu wareejiyey silig. Ciidamada ayaana naga joojiyey inaan isticmaalno, marka habeenkii ayaan u soo dhuuman jirney. Waxyaabahaas oo dhan waxaa nalaku soo rogey sanadkan. Habeenkii ayaan isku daynaa inaan soo helno biyo aan guryaha dhiganno. laakiin haddii ay askartu ku arkaan adigoo biyo qaadanaya waa ay ku dilayaan"
- Qof wax ka deggan tuulada, September 22, 2007

“Haddii dawladda federaalka ahi ay raaci lahayd sharciga, waa ay wanaagsanaan lahayd, laakiin xitaa sharciga ay samaysteen cidina kuma dhaqanto.”
- Garsoore hore ee maxkamada gobolka, December 5, 2007

Warbixinta Human Rights Watch ee “Ciqaab Wadareed: Dembiya Dagaal iyo Dembiyo Ka dhan ah Bani'aadannimada oo ka dhacay Deegaanka Ogaden ee Gobolka Somalida ee Itoobiya" waxaa laga heli karaa :
http://hrw.org/reports/2008/ethiopia0608/